



**Su'aalaha Inta Badan La Isweydiyo –
Gargaarada Dowladdeed
Cusboonaysiintii u dambaysay Janaayo 31, 2020**

Afeef: Dokumentigani *kamakoobna* oo ma aha mid talo dhanka sharciga ah. Dadka ka walaacsan haddii iyo sida helitaanka garaagada dadweyne laga yaabo in ay xaaladooda deganaansho saameyn ugu yeelato waa in ay caawimaad ka codsadaan qareenka dhanka socdaalka.

Waxa ay tahay in dadku ka ogaadaan xaalada hadda ee xisaabinayn gargaaro dowladdeed “public charge”:

- **Xeerka gargaarada dowladdeed ‘public charge’ ee cusub ma aha mid hadda ka dib la joojiyay/xannibay. Wuxuu dhaqan geli doonaa Febraayo 24-keeda, 2020. Xeerka cusub ma noqon doono mid muddo hore la oggolaaday.**
 - Janaayo 27, 2020, Maxkamadda Sare ee Maraykanka ayaa dhinac iskaga dhigtay ammar hordhac ahaa oo ka socday New York kaasi oo Wasaarada Amniga Gudaha ee Maraykanku ka horjoogsaday in uu xeerka gargaarada dowladdeed ‘public charge’ ka dhaqan galo dalka oo dhan.
 - Sababta oo ah xeerka cusub oo aan noqon doonin mid muddo hore la oggolaaday, cidna loo qabsan maayo ilaa Febraayo 24-keeda, 2020.
- **Iyada oo la tixgelinayo dadaalada dhanka dacwada ah ee socda, waa muhiim in dadku ogaadaan xaqiiqooyinka, isla markaana la socdaan macluumaadka cusub:**
 - Xeerka gargaarada dowladdeed ‘public charge’ ee cusub. **ma aha** mid khuseeya muhajir kasta.
 - Kuwo badan oo ah gargaarada dadweynaha **looma** xisaabiyo inay yihiin gargaarada dowladdeed ‘public charge’.
 - Gargaarada dadweynaha ee carruurtaada iyo xubnaha kale ee qoyska ay helaan **looma** xisaabinayo adiga marka ay noqoto daraasadda lagu sameynayo gargaarada dowladdeed ‘public charge’.
 - Kaliya helitaanka gargaaradada dadweynaha oo kali ah **kaama** dhigayo qof helaya gargaarada dowladdeed ‘public charge’.
 - La soco Waxa jira. Dacwadu way si socotaa waxbaana isbeddeli kara. Ha gaarin go’aano adiga oo ku saleynaya cabsi, ka dhig kuwo ku saleysan xaqiiqojin.
- Kuwa qaba su’aalo ama walaac ku saabsan sida gargaarada dowladdeed ‘public charge’ ay saameynta ugu yeelan karaan iyaga ama xubnaha ka tirsan qoyskooda waa in ay la xiriiraan qareenka dhanka socdaalka wixii caawimaad ah.
 - Wac **Khadka Gargaarka Dadweynaha ee Oregon 1-800-520-5292** wixii

- caawimaad lacag la'aan ah, ama
 - Booqo internet-ka si aad u hesho qareenka dhanka socdaalka oregonimmigrationresource.org.
- Gobolka Oregon ayaa si dhow ula socda halka ay wax marayaan ee dhanka gargaarada dowladdeed 'public charge'.
 - Waxaanu sii wadi doonaa in aad macluumaadka cusub la socodsiiino macaamiisheena, hawl-wadaagayaasha bulshada, xubnaha dadweynaha iyo wax-daneeyayaasha kale marka macluumaad dheeraad ah la heli karo.

Taariikhda: Ogoosto 12, 2019, Wasaarada Amniga Gudaha ee Maraykanku ayaa ku dhawaaqday in la dhammeystiray xeerka gargaarada dowladdeed 'public charge' ee cusub. Xeerkani wuxuu dhaqan gelayay Oktoobar 15, 2019. Si kastaba ha ahaatee, si ku meel gaar ah ayay u xannibtay/joojisay maxkamadaha federaalku. Janaayo 27, 2020, Maxkamadda Sare ee Maraykanka ayaa dhinac iskaga dhigtay saddexdii ammar ee u dambeeyay ee federaalka ee lagu joojiyay/xannibay in xeerka cusub ee dhaqan galo. Tani macnaheedu waa in xeerka gargaarada dowladdeed 'public charge' ee cusub uu hadda dhaqan geli karo. Waxa kaliya ee ka reeban waa Illinois halkaasi oo xeerku wali xanniban yahay ammar gobolka oo dhan ah.

Waa maxay gargaarada dowladdeed?

Gargaarada dowladdeed "public charge" waxaa isticmaala mas'uuliyiinta laanta socdaalka si loo go'aamiyo haddii qofku:

- Soo gali karo Maraykanka, ama
- Heli karo sharciga deganaanshaha rasmiga ah (LPR) (tusaale, kaarka deganaanshaha 'green card').

Sidee baa go'aanada gargaarada dowladdeed "public charge" loo gaaray?

Mas'uuliyiinta laanta socdaalka ayay tahay in ay fiiriyaan dhammaan duruufaha qofka si loo go'aamiyo haddii uu qofku u badan yahay in uu *mustaqbalk*ku tiirsanaado taageerada dowladda. Isticmaalka gargaarada dadweynaha waxay ahaayeen in ay kaliya noqdaan mid ka mid ah dhowr arrimood oo la eegayo si go'aankan loo gaaro.

Maxaa dhacaya haddii qofka la ogaado in uu yahay mid helaya gargaarada dowladdeed 'public charge'?

Saraakiishu waxay diidi karaan soo gelitaanka codsadhaha ee Maraykanka ama kaarka deganaanshaha 'green card'.

Qofkee ayay gargaarada dowladdeed "public charge" saameyn ku yeelanayaan?

Kaliya dadka ay gargaarada dowladdeed "public charge" saameynta ku yeelanayaan waa kuwa:

- Dalbanaya in ay soo galaan Maraykanka.
- Dalbanaya in helaan kaarka deganaanshaha 'green card' ama
- Haysta kaarka deganaanshaha "green card" ee ka tega Maraykanka muddo gaaraysa 180 maalmood ama ka badan oo xiriir ah, ka dibna dib u soo gela dalka.

Qofkee ayaanay gargaarada dowladdeed saameyn ku yeelanayn?

- Muwaadiniinta Maraykanka:
 - Kuwa ku dhashay dalka Maraykanka, iyo
 - Kuwa muwaadiniinta noqday.
- Dadka haysta kaarka deganaanshaha "green card" (marka laga reebo ka

tega Maraykanka wax ka badan 180 maalmood oo xiriir ah ama ka badan). Tani waxaa ka mid ah:

- Dadka haysta kaararka deganaanshaha “green cards” ee dalbanaya muwaadinimada Maraykanka, iyo
- Kuwa dib u cusbooneysiinaya kaarkooda deganaanshaha “green card”.
- Xubnaha shaqada ciidan haya iyo qoysaskooda.
- Muhaajiriinta Maraykanka u jooga sababa bani’aadaminimo. Tusaale:
 - Qoxootiga
 - Magan gelyo doonka (oo ay ku jiraan dadka dalbanaya magan gelyo la siiyo)
 - Dadka leh Xaalad Si Ku Meel Gaar Ah Loo Ilaaliyo (TPS)
 - Xeerka Rabshada Ka dhanka ah Haweenka (VAWA) dadka iskood si gaar ah codsi u gudbinaya
 - Dadka codsanaya ama haysta fiisooyinka T ama U
 - Dadka haysta Xaalada Dhalinyarada Muhaajirka ah ee Gaarka ah (SIJS)
 - Dadka qaarkood ee meel ay ku xirnaayeen laga sii daayay, iyo
 - Noocyada kale oo ah dadka aan muwaadiniinta ahayn.

Maxay yihiin barnaamijyada gargaarada dadweynaha ee ka jira Oregon ee loo xisaabinayo gargaarada dowladdeed ‘public charge’ ee cusub ahaan sida uu dhigayo xeerka cusub?

- Qorshaha Caafimaadka Oregon ee Aan degdega ahayn (tusaale, Medicaid) ee loogu talagalay caymiska dadka waaweyn ee aan uurka lahayn ee da’doodu tahay 21 iyo ka weyn.
- Daryeelka muddada fog ee ay Medicaid dhaqaalihiiisa bixiso.
- Barnaamijka Gargaarada Nafaqada Dheeraadka ah (Supplemental Nutrition Assistance Program - SNAP), ama kaararka cuntada.
- Barnaamijyada gargaarka lacageed ee federaalka, gobolka ama degaanka. Tani waxaa ka mid ah:
 - Sugidda Dakhliga ee Kabista ah (SSI), iyo
 - Taageerada Ku meel gaarka ah ee Qoysaska Baahan (TANF).
- Taageerada dhanka ijaarka ee Section 8 (tusaale, foojarada kala doorashada guryaha).
- Guryaha Mashruuca ah ee Section 8 ku saleysan iyo guryaha la kabo.

Maxay yihiin barnaamijyada gargaarada dadweynaha ee ka jira Oregon ee aan loo xisaabinayo gargaarada dowladdeed ‘public charge’ ee cusub ahaan sida uu dhigayo xeerka cusub?

- Caymiska Qorshaha Caafimaadka Oregon ee loogu talagalay dhalinyarada da’doodu ka yar tahay 21 (tusaale, Medicaid iyo Barnaamijka Caymiska Caafimaadka ee Carruurta (CHIP).
- Caymiska Qorshaha Caafimaadka Oregon ee loogu talagalay dadka uurka leh oo ay ku jiraan 60 maalmood ka dib marka hooyada ilmaha dhasho (tusaale, Medicaid iyo Caafimaadka Degdegga ah ee Plus Muwaadinka Ajnabiga Laga Saamaxay, ama CAWEM) Plus,)
- Barnaamijka Oregon MothersCare (OMC).
- Caymiska Qorshaha Caafimaadka Oregon ee Degdega ah ee loogu talagalay dadka da’kasta leh (tusaale, CAWEM).

- Barnaamijka Cover All Kids ee Oregon.
- Adeegyada waxbarashada gaarka ee dhaqaalihiiisa lagu bixiyo Xeerka Waxbarashada Dadka Naafada ah (IDEA) ee ay daboosho Medicaid.
- Early Head Start iyo Head Start/Oregon PreKindergarten.
- Magdhowga ee daryeelka carruurta ee Shaqaalaynta la Xiriirta Daryeelka Carruurta.
- Adeegyada caafimaadka dugsiya ku-salaysan ee loogu talagalay carruurta gaartay da'dii dugsiya lagu aadayay.
- Barnaamijka Qadada Dugsiya ee Lacag la'aan ah ama Qiimaheeda hoos loo dhigay (marka laga reebo: xeerka cusub oo tixgelinta siin doona haddii uu jiray isku gudbinta barnaamijkan oo la sii marayo SNAP).
- Barnaamijka nafaqada dheeraadka ah ee Haweenka, Dhallaanka iyo Carruurta (WIC).
- Kabista lacagta caymiska caafimaadka ee ganacsiga ah iyada oo la adeegsanayo Meesha Hawsha Caymiska Caafimaad u Qaabilsan ee Oregon.
- Barnaamijyada iyo adeegyada Goobta Cuntada Lagu Kaydiyo ee Oregon.
- Barnaamijyada Xeerka Qofka Waayeelka ah ee Maraykanka ah (OAA).
- Barnaamijyada gobolku dhaqaalihiiisa bixiyo ee lagu caawiyo dadka waaweyn iyo dadka naafada ah (tusaale, barnaamijka Mashaariicda Madaxa bannaan ee Oregon (OPI)).
- Kabitaanka Dakhliga Hooseeya (LIS) ee Medicare Part D.
- *Barnaamijyada kale ee adeegyada caafimaadka iyo bulshada oo badan ayaan halkan ku qornayn.*

Su'aalaha? Fadlan la xiriir hay'adaha gobolka ama barnaamijyada soo socda.

Waaxda Adeegyada Dadweynaha

- Nicole Stapp, Kooxda Xiriirada Sharci dejinta
Nicole.Stapp@dhsosha.state.or.us

Waaxda Waxbarashada ee Oregon

- Carmen Xiomara Urbina, Agaamisa Ku-xigeenka Carmen.Urbina@state.or.us

Oregon Health Authority

- Jeannette Taylor, Xiriirada Dowladdeed
Jeannette.T.Taylor@dhsosha.state.or.us

Meesha Hawsha Caymiska Caafimaad u Qaabilsan ee Oregon

- Chiqui Flowers, Maamulaha Chiqui.I.Flowers@oregon.gov

Guryaha Oregon iyo Adeegyada Bulshada

- Nicole Stoenner, Isku xiraha Xiriirada iyo Isgaarsiinta Dowladda
Nicole.R.Stoenner@oregon.gov